

# KULANKA 8:AAD

KEDDIS-JOOJINTA



## KEDDIS-JOOJINTA

Keddis-joojin ayaa la adeegsada markii wax laga qabanaayo iska-horimaadyo si badanaayo oo dhibaatooyin keeni kara. Waa la dagaalan aan laga weecan karin. Waa in durbadiiba aad xaalada joojisa – adeegso keddis-joojinta. Keddis-joojinta waxay had iyo jeer ku salaysan tahay hoos u dhigida firogaar-siin dirirka.

Markii iska-horimadyo sii korarsamaayaan...

- Hadal xasilan. Hoos u dhig codka kaddib hab degan la hadal cunugga. Haddii loo baahan yahay inyar u macneey. Gacantaada cunugga ku salaax ama ku dheh ery gaaban oo fudud, tusaale ahaan: "Kaalay, aan baxne, aniga iyo adiga aan is dejinno."
- Raac cunugga. Raac cunugga, ka fogaada xaalada jirta, inyar wadajir u fadhista meel hab xasilan lagu nasan karo. Carruurta qaarkood waxay doorbidan in waqti yar keligood noqdaan. Taasi ixtiraam koorna ka ilaali cunugga ilaa u xasilan ka muujiyo.
- Xasilaan iyo dhexdhexaad. Sug ilaa cunugga u ka muujiyo xasiloni, ha siin wax firogaar ah oo aan ahayn inaad u muujiso goob-joogid oona goobta ka muuqato ilaa cunugga u ka muujiyo xasiloni. Ka feker inaad adiga is dejiso iyo dhexdhexaadnimo, taasoo looga hortago isku xirka diriirka iyo waqtiga yar ee laga helo.
- Ku noqda dhaqdhaqaaqa. Markii cunugga uu is dejiyo kaddib ku noqda wixii aad samaynayseen iska-horimadka kahor (cuntayta cashada, dhar gashasho, dugsi aadid iwm) adigoo ka hadlin hab-dhaqanka cunugga. Teeda kale, wax kale ayaa wadajir u samayn kartaan. Firogaar-sii cunugga kaddib markii u ka muujiyo xasiloni!



In laga feker: Intii aadan bilaabin adeegsashada keddis-joojinta, ka feker haddii aad sii fiican u adeegsateen saldhigga ahraamka. Waa habka ugu wanaagsan ee iska-horimaadyo looga hortago.

## KA FEKER MARKII AAD KEDDIS-JOOJINTA ADEEGTSANAYSO

- Carruurta badidooda waxaa muhim u ah ogaanshada wax dhici doono. Sidaas awgeed cunugga waad u diyaargarayn kartaa keddiss-joojinta. Markii labadiina ba aad is dejisan adigoo ka sheekeeyo ama tusinaayo qaabka.
- Haddii cunugga uu aad u caraysan yahay, waxaa wanaagsan in cunugga dareenkiisa loo muujiyo sida hadba ku tilmaaman kulanka 7:aad.
- Ka fogey cunugga firogaar-siin sababta iska-horimad adigoo joojiya cabashada/ yuuska, qaylada iyo canaanta. Hoos u dhig dooda iyo macnaynta badan. Dooda dhaadheer waxaa loo macnaysan karaa sidii canaan oo kale. Haddii aad u baahan tihiin inaad ka doodaan xaalad jirta, waxaa fiican in xilli kale laga doodo.
- Mararka qaarkood cunugga wuxuu biloowga aad bilaabi karaa innuu ka doodo oo dirir muujiyo. Isku day inaad is dejiso kaddib sii wad keddiss-joojinta. Xambaar cunugga haddii loo baahdo. Carruurta waawayn waxaa fiican in goobta ay isaga tagaan.
- Keddiss-joojinta waa in loo qaadan waxa meelkadhac ama hanjibaad ku salaysan. Ku dirqiska cunugga in uu yiraahdo raali iga noqda badi ahaan wax fiican ma tarto. Keddiss-joojinta sii fursad.



## KEDDIS-JOOJINTA KU GAARKA AH

Qofka waalidka ahi way u fudud tahay ku dhaca dareen culus goorta isaga iyo ubadkiisa iska-horimaadaan. Xaalad hab wanaagsan lagu adeegsan karo keddiss-joojinta waxaa weeyaan in waalidka uu is dejiyo. Ka feker in aad tahay qofka ubadkaaga u ku daysado markii ay noqoto in caraysnaanta wax laga qabto (*Mabda'a kuddayashada*).

Haddii aad u caraysan tahay waxaad u baahan tahay in marka hore is dejiso kahor isku daygadejinta cunugga:

- Istaag/joogso. Isku day inaad Istaag/joogso markii aad dareemayso inaad caraysan tahay, erey dareenkaaga u yeel, tusaale ahaan is-dheh "Waa tahay, imminka waan caraysa nahay".
- Ka dhaqaaq goobta. Wargeli cunugga inaad u baahan tahay inaad goobta ka fogaato una sheeg sababta, tusaale ahaan ku dheh "Waxaan u baahan nahay in aan in yar fogaado oo aan is-dejiyo, dhaqsi ayaan soo noqonayaa". Haddii goobta laga tegi karin isku day inaad joogsato kaddib xoog-saarkaaga waqti yar ku wareejiso wax kale. Adeegso xoog-saarka dhaqdhaqaaqa ama ka feker waxyaalaha ku dejiyo.



## DURUUSTA GURIGA – KULANKA 8:AAD

Waqtiga yar ee wadajirka

.....

DGU/Tusaalaynta maska

.....

Xulashada la dagaalanka/Keddis-joojinta

.....

## KULANKA 9:AAD KAHOR

Waqtiga yar ee wadajirka

.....

DGU/Tusaalaynta maska

.....

Xulashada la dagaalanka

.....

Keddis-joojinta. Iyadoo kooban tilmaan xaalad oo keddis-joojin awgeed toddobaadkaan u adeegsatay.

.....

